Ururka gargaara caruurta: warar loogu talagalay waalidiinta

Ururka gargaara caruurta (children's aid society) ama CAS waajibaad sharci ah ayaa ka saraan in ay ku dadaalaan dhibaato ka dhoowrista caruurta da'doodu ka yar tahay 16 sano. Waxaa dhici karta in ay ku lug yeeshaan ilmaha ay waxyeelada ka ilaalinayaan ilaaiyo inta ay da'doodu ka gaareeyso 18 sano. Dowladda ayaana iyaga howshaas u xilsaartay.

Goorma ayeey CAS baareyaan Qooyska?

Waxaa sharci ahaan waalidiinta waajib ku ah inay caruurtooda ka ilaaliyaan wixii waxyeelo u keeni kara. CAS waxey qooyska baari karaan haddii ay rumaysan yihiin in:

- waalidiintu uu midba midka kale la dagaalamo,
- waalidiintu ku kacaan waxyaabo ilmaha waxyeelo u geysan kara, ama
- uu waalid ka hor istaagiwaayo ninkooda, naagtooda, ama dadka kale, oo ay ku jiraan xubno kale ee qooyska, in ay ku kacaan arrimo caruurtooda waxyeeleyn kara.

Waa kuwan tusaalooyin dhowr ah ee falalka CAS u horseedi kara in ay qooyska baaris ugu tagaan:

- caruurta oo la caayo ama laguu qeyliyo,
- caruurta oo la tumo ama la xirxiro,
- caruurta oo ciqaab looga dhigo cunto u diidid,
- caruurta oo loo taabto si galmo ahaan ah, ama
- caruurta oo keligood laga tago iyadoon lagu dhaafin qof weyn oo karti u leh in uu iyaga daryeelo.

Sideebay CAS ku ogaanayaan in uusan ilmahu badbaado qabin?

Haddii uu jiro qof si macquul ah u rumaysan in ilmo waxlayeelay ama ay suurtoowdo in waxyeelo loo geeysto, waa in uu u sheega CAS. Xattaa qaraabada, asxaabta, iyo dariska waxaa sharci ahaan waajib ugu ah in ay arrimahaan soo shegaan.

Dadka la shaqeeya caruurta waa in ay arrimahaan CAS la socodsiiyaan haddii kale booliiska ayaa dembi ku soo oogi kara. Waxaa tusaale ahaan loo soo qaadan kara macallimiinta, takhaatiirta, kalkaaliyaasha, shaqaalaha goobaha caruurta lagu xanaaneeyo, la-taliyaasha qooyska, howlwadeennada bulshada, iyo hogaamiyaasha diinta.

Garyaqaankaagu (lawyer) waajib kuma aha in uu kuu sheego CAS.

Maxaan sameeyaa haddii uu hawlwadeen ka socda CAS ila soo xiriiro?

Intii karankaaga isku day in aad xasiloonaato markaad la hadlaysid howlwadeenka CAS. Waxaa haboon in aad la xiriirtid garyaqaan inta aadan waxba sheegin. Hey'adda Ontario ee dadka ka caawinta xagga sharciga (Legal Aid Ontario) ayaa kaa bixin karta kharajka garyaqaanka haddii aadan adigu awoodin in aad iska bixiso.

Sida qaalibka ah, howlwadeenka CAS waa in uu ogolaanshaagu haysto inta uusan soo gelin gurigaaga. Sida caadiga ah waxaa fiican in aad u ogolaatid in ay guriga soo galaan haddii kale arrintu intaas weey ka sii xumaan kartaa. Haddii ay ka furan waayaan, howlwadeennada CAS si ay u daafacaan caruurta xoog bay guriga ku soo geli karaan. Boolis bey soo wadan karaan.

Haddii aad **wax** dhibaato ah ku qabtid fahamka ama aadan ku hadlin af Ingiriiska, u sheeg howlwadeenka CAS. Waxaad codsataa turjibaan si fiican ugu hadla afkaaga iyo Ingiriiskaba. Haddii ay CAS mid kuu heliwayaan, adigu waa in aad isku daydaa sidii aad turjibaan ku heli lahayd.

Hawlwadeenka CAS sida caadiga ah gooni gooni buu waalidka iyo caruurta ula kala hadlaa. Waa in ay qortaan wax kasta oo aad adigu ama caruurtu iyaga u sheegtaan. Wararkaas iyaga ah maxkamadda ayaa hadhoow si adiga lid kugu ah loogu isticmaali karaya.

Falalka qaarkood oo caruurta waxyeeleeya waa dambi. Mar kasta, haddii ay kula noqoto in howlwadeenka CAS ama boolisku ay kugu tuhmeen dambi, la socodsii in aad u baahan tahay la-talin sharciyeed inta aadan ka jawaabin su'aalo kale oo dambe. Isla markaasna la xiriir garyaqaankaaga.

➥ bogga 2aad warar kale ayaa ku qoran ➥

Maxeey CAS sameyn karaan?

CAS waxyaabo kala duwan in aad sameysid bey kugula talin karaan. Waxaa dhici karta in ay rabaan in aad ogolaatid waxa ay ku yiraahdaan.

Warqadna ha u saxiixin CAS inta aad marka hore garyaqaan talo ka heleeysid. Aad ayeey muhiim u tahay in aad heshid garyaqaan adiga kaa socda xataa haddii aad dooneysid in aad CAS heshiis la geshid.

Kiisaska qaarkood, CAS ilmahaaga wey kaala tegi karaan.

Maxaa dhacaya haddii CAS ay ilmaheyga igala tagaan?

U sheeg CAS haddii xubin qooyskaaga ah ama dad kale oo waaweeyn oo ka tirsan beeshaada ay ilmaha xanaaneyn karaan. Haddii ay CAS u geyn weydo ilmahaaga si ay ula joogaan qarabadaada ama saaxibadaada, markaasi hey'ad beeleed ama qooys ay dowladdu lacag siiso ayaa ilmahaaga xanaaneeyn doona. Caadiyan, ilmahaaga in aad soo booqatid waa laguu ogolaan doona.

Isla markaas garyaqaan u raadso si ilmahaaga dib laguugu soo celiyo. Waa in aad arrintaan ku dhaqaaqda meel kasto oo ilmahaaga la geeyo, xataa haddii ilmahaaga loo geeyo qaraabo ama saaxiibo in ay la jogaan.

Ma u baahan doonaa in aan maxkamad tago?

CAS waa in ay kiiskaaga hor geeyaan maxkamadda qooyska haddii ay ilmahaaga kaa qaataan ama ay doonayaan in ay weydistaan maxkamadda in ay kugu amarto in aad raacdid talada CAS. Haddii ay ilmahaaga kaa qaataan, maalinta kowaad oo maxkamadda la tagayo waa in ay ahaato 5 beri gudahooda oo laga soo bilaabo maalintii ay ilmaha kaa qaateen.

Waxaa dhici karta in aad marar badan maxkamadda isaga daba noqotid. Isla markaas raadso garyaqaan si uu kaaga caawiyo arrimaha maxkamadda. Garyaqaanku waa inuu khibrad u leeyahay kiisaska CAS.

Haddii boolisku ay dambi kugu soo oogaan, waxaad xaq u leedahay in dacwadaada la hor geeyo maxkamadda dembiyada. Tani waa ka duwan tahay kiiska hor yaal maxkamadda qooyska, in kasto isku arrin looga xaajoon karaayo. Isla wakhtigaas raadso garyaqaan kibrad u leh kiisaska ku lug leh dambiyada. ⁂

Boggaan waxaan kuugu sheegeeyna warar guud oo keliya. Waa in aad heshaa la-talin sharciyeed oo xaaladaada ku saabsan.

Sida kaalmo loo helo

Findhelp waa hey'ad beeleed oo dadka ku caawisa luqado badan. Waxey teleefoonka ka jawaabaan afar iyo labaatanka saac (24-ka saac), toddobada beri ee asbuuc walba.

Waxey kuu sheegi karaan:

- meesha aad cawinaad sharci ka heli kartid, iyo
- sida aad ula xiriiri kartid hey'ad dejineed ama hey'ad beeleed oo aad ka heli kartid caawinaad noocyo kale ah.

Findhelp kala xiriir:

☎ Lacag la'aan ah (Toll-free) **1-866-667-5366**

☎ Lacag la'aan ah ee dadka maqalka ka dhibaateeysan (Toll-free TTY) **1-888-340-1001**

💻 **www.211ontario.ca**

Caawinaado kale:

Waxaa soo diyaariyey CLEO (Community Legal Education Ontario/Éducation juridique communautaire Ontario) iyagoo ay kala shaqeyeen CLEO Six Languages Advisory Group, oo ka kooban 10 hey'adood oo xubin ka ah.
Mashruucaan waxaa maalgaliyey Ontario Trillium Foundation iyo Legal Aid Ontario.
CLEO waxey Findhelp uga mahad celinaaysa caawinaada teleefoonka oo ay mushruucaan ka geeysteen.
Booqo **www.cleo.on.ca** si aad bogogaan iyo warar kale ugula soo baxdid.